



Waxa Loogu talagalay Waalidiinta isticmaalaya adeegyada ay IRCC-fuundayso

AAD UGU HEELLAN DHAMMAAN DARYEELKA
CARRUURTA DALKA KU CUSUB (CARE FOR NEWCOMER CHILDREN – CNC)

Soo Dhowow! Barnaamijka CNC waxa gaar ahaan loogu talagalay in lagu taageero carruurta ku cusub Canada iyo qoysaskooda xillih ay helayaan adeegyada ay maalgeliso IRCC-da. Waxaan halkan u joogaa inaan caawino.

Waan ognahay inuu wakhtigaan kuu yahay mid isbedel wayn kugu leh adiga iyo qoyskaaga. Hadafkayagu waa in ilmahaagu uu dareemo soo dhowayn, deganaan iyo xasillooni, isla markaana aan ka caawinayno horumarkooda iyo dhisidda kalsoonidooda sida uu qoyskaaga Canada u degaayo.

**MARKUU
ILMUHU JOOGO
BARNAAMIJKA
CNC, WAALIDKU
WAA INAY
JOOGAAN GOOBTA
MAR KASTA.**

Majiraan wax badbaada ilmahaaga ka muhiimsaqn!

Waad ku kalsoonaan kartaa shaqaalahayagu inay yihiin kuwo xirfad iyo khibrad leh.

- Shaqaalaha dhammaan waxay soo mareen baaritaanka taariikh-dooda/diiwaanka taariikhda dambiyada oo waxay qaateen tababbarka gargaarka kowaad.
- Waxaan raacnaa Shuruudaha CNC waana lana kormeeraa si loo hubiyo inaan la kulano shuruudaha caafimaadka iyo badbaada.
- Si loo hubiyo in carruurta oo dhan loola dhaqmo si wada siman oo ixtiraam leh, waxaan leenahay habdhaqan. Shaqaaluhu waa inay ugu xoojiyaan habdhaqannada siyaabo wanaagsan. Edbinta wax ku dhufasha jirka carruurta ama si xun ula hadalka ayaan la oggolayn; sidoo kale lama oggola dayacaada ama kormeer la'aanta.
- Shaqaalaha waxa ka saaran xilka hawlyaqaanimo iyo waajibaadka sharci inay uga warbixiyaan awoodaha ku habboon xaalad kasta oo ilmaha waxyeello loo geysanayo ama lagu dayacay.

Xor u ahow inaad na weyddiisato nuqul ka mid ah ujeedooyinka maareynta habdhaqanka ama si xun ula dhaqanka/daayaca ilmaha loogu shakisanyahay haddii aad rabto inaad arrimo dheeraad ah aad ka ogaato.

Maxaad ka filan kartaa CNC?

Sida aan ugu daryeelno carruurta koox ahaan marka la joogo gudaha Canada ayaa laga yaabaa inay ka duwanaato tii ka jirtay dalkaagii. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan edbinta, cuntada, luqadda, waxbarashada ama waxyaabaha caadada ah, fadlan weyddii. Cilmibaarista ayaa muujinaysa inay carruurta ay wax ka bartaan ciyaaraha, sidaa darteed shaqaaluhu waxay qorsheeyaan hawlo waxbarasho oo ku saleysan ciyaaraha sida kolba habboon xiisaha, da'aha, kartida iyo dhaqammadaba. Ilmahaagu wuxuu ku tababbaran doonaa la dhaqanka carruurta kale oo u soo saari doonaa xirfadaha iyaga u diyaarin doona dugsiga.

Sideed uga caawin kartaa ilmahaagu inuu la-qabsado CNC?

Waa wax caadi ah in ilmahaagu ka cabsado bilaabka CNC. Shaqaalaha ayaa kaala shaqayn doona si looga dhigo kal-guurka mid sahlan laakiin, marka hore, waxa dhici karta inuu ilmahaagu ooyo, adiga kugu dhegdhego, ama muujiya habdhaqanno kale. Fikradaha ku saabsan sida aad uga caawin karto ka yaraynta baqidda ilmahaaga, wayddiiso nuqulka *Kusoo dhowow CNC: Hagaha Waalidka ee Kala-maqaashaha Guusha leh (Welcome to CNC: A Parent's Guide to Gradual Separations)*

Wadaxiriirka u dhexeeya waalidiinta iyo shaqaalaha ayaa muhiim ah!

Waxaan kugu dhiirigelineynaa inaad barato shaqaalahayaga CNC oo aad la wadaagto macluumaadka ku saabsan ilmahaaga. Markaan wada shaqeyno dhammaanteen, waxaan si ka sii fiican karti ugu yeelanaynaa inaan taageerno ilmahaaga oo aan badbaado ka dhigno.

AAD UGU HEELLAN DHAMMAAN DARYEELKA CARRUURTA DALKA KU CUSUB

Xusuusnow oo hubi inaad u sheegto shaqaalaha:

- xasaasiyadaha (alerjiyada) iyo xaddidyada cuntada;
- cudurrada ama daawooyinka ilmahaagu qaato (fadlan ogsoonow: dawada waxa loo bixiyaa kaliya xaaladaha nolosha halista galineya oo ma aha in loogu tego ilmahaaga ama gudaha boorsadooda);
- iyo baahiyada ama caqabadada gaarka ah. Waxay dhici karta inay ku caawiyaan!

Waxa kale oo waxtar leh inaad u sheegto shaqaalaha:

- jadwalka sexashada gaaban iyo quudinta ilmahaaga;
- waxyaabaha u xiiseeyo iyo cuntooyinka u jecel yahay ilmahaagu;
- ereyada laga yaabo inay ka caawiyaan shaqaaluhu inay la hadlaan ilmahaaga;
- ereyada laga yaabo inay ka caawiyaan shaqaaluhu inay la hadlaan ilmahaaga;
- iyo siyaabaha gaarka ahee aad u daryeesho ilmahaaga iyo waxa laga yaabaa aad ka rabto CNC.

Waxyaabaha kale ee ah in maskaxda lagu hayo:

- Badbaadada ilmahaaga awgeed, kaliya waalidka u diiwaangashan adeegyada ayaa keeni kara ama ka qaadi kara carruurtooda goobta.
- Waa inaad mar kasta u saxeexdid ilmahaaga soogelidda iyo bixitaankaba.
- Ilmahaaga sida habboon ugu soo geli dharka labadaba awgeed cimilada iyo waxqabayada ay ka qaban doonaan hawlaha barnaamijka. Haddii aad wax su'aalo ah aad ka qabto waxa dharka u ilmahaagu soo gashanayo yihiin, weyddii shaqaalaha.
- Waa muhiim inaad ilmahaaga si joogto ah u keento oo aad ugu diyaariso dugsiga. Haddii ilmahaagu goobta ka maqanaanyo, u sheeg shaqaalaha.
- Haddii ilmahaagu jiran yahay, ku hay guriga si looga hortago faafidda cudurka. Carruurta leh qandhada ama shubanka waa inay noqdaan kuwo.

DHAMMAAN ARIMAHA KU SAABSAN BARNAAMIJKAYAGA CNC

Magaacda Daryeel-siiyaha: _____
 Caregiver's Name / Nom du dispensateur de soins

Saacadaha CNC: _____
 CNC Hours / Heures de garde d'enfant

	Haa Yes / Oui	Maya Non / Non
Tallaallada loo baahan yahay Immunization required / L'enfant doit avoir été vacciné	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Waxaan bixinaa cunto fudud We provide snacks / Nous fournissons des collations	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
U soo qaad ilmahaaga qado/cunto fudud Bring food for your child's lunch/snack / Apportez le déjeuner/la collation de votre enfant	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Adiga ayaa u daryeelaya ilmahaaga qadada You care for your child at lunch / Vous prenez soin de votre enfant au déjeuner	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Waxaan leenahay waqtiga hurtada-gaaban We have a naptime / Notre programme prévoit une sieste	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

	Haa Yes / Oui	Maya Non / Non
U soo-qaad toy ilmaha lagu sasabo Bring a comfort toy / Apportez un jouet réconfortant	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Dhar dheeraad ah soo qaad Bring extra clothes / Apportez des vêtements supplémentaires	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
U soo qaad kabaha dhismaha gudihiisa loo isticmaalo Bring indoor shoes / Apportez des chaussures d'intérieur	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Soo qaado buste (haddii loo baahdo) Bring a blanket (if needed) / Apportez une couverture (si nécessaire)	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
U soo qaado xafaayado (haddii loo baahdo) Bring diapers (if needed) / Apportez des couches (si nécessaire)	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>



**TAAGEERIDDA DARYEELKA IYO DEJINTA CARRUURTA
 SOOHAAJIREYAASHA AH EE DA'YARTA AH**

Si aad u hesho ilo dheeraad ah oo loogu talagalay waalidka, booqo: www.cmascanada.ca



**Care for
 Newcomer
 Children**